# HERO Kids Registry

## Hagida lagu diiwaangeliyo carruurta iyo dhalinyarada

HERO Kids Registry waxaa helaya cunug walba oo degan Oregon ama dhalinyarada da'yarta ah ee jirta 0-26. Is diiwaangelinta waxaa dhammaystiri kara waalidiinta, masuuliyiinta sharciga, iyo dhalinyarada da' yarta ah ee jirta 15-26. Fiiro gaar ah: Waalidiinta Ilaha Oregon (Oregon Resource Parents) ma diiwaangelin karaan carruurta ku jirta daryeelkooda.

Iska diiwaangelinta HERO Kids, waxaad siineysa adeeg bixiyayaasha EMS iyo ED bilow hore oo ay ku fahmaan taariikhda caafimaadka ee cunugaaga iyo baahiyaha gaarka ee xaaladda degdega ah. Fiiro gaar ah: "Adeeg bixiyaha" waa qof walba oo bixiya daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan dhakhatiirta, kalkaaliyaasha, shaqaalaha gurmadka caafimaadka iwm.

*Diiwaanegelinta waxaa loo isticmaala oo kaliya xaalad caafimaad oo degdeg ah. Ma damaanad qaadayso daryeelka gaarka ah, daaweynta, tallaabada, ama isbitaalka.*

### LABO TALLAABO OO FUDUD OO LA ISKU DIIWAANGELIYO

Waxay qaadanaysa inta u dhaxeysa 15-60 daqiiqo, waa in lagu dhammaystiraa hal fadhi haddii waad soo bilaabi doontaa.

1) Soo ururi maclumaadka caafimadka ee cunuga ama dhalinyarada. Ka akhri qoraalada hoose wixii faafaahin ah oo aad u baahan doonto. Talo: Soo koobida booqashada kadib waa meelaha fiican ee inta badan laga helo macluumaadkan.
2) Buuxi foomka diiwaangelinta onlynka ah www.herokidsregistry.org.

FIIRI SANDUUQA BOOSTADAADA! Warqadda soo dhawaynta, istiikarada, iyo sumada boorsada dhabarka waa inay ku yimaadan labo ilaa afar toddobaad. Haddii aadan helin xirmada soo dhawaynta ama aad qabto su'aalo guud oo ku saabsan HERO Kids Registry, fadlan wac xafiiska ganacsiga 833-770-4376.

## HAGIDA DIIWAANELINTA HERO KIDS

*Kuwani waa meelaha lagu sheegay inaad galiso marka aad diiwaangelineyso, iyo qoraalada qaar ee mid walba. Foomka diiwaangelinta onlaynka waa in lagu dhammaystiraa hal fadhi haddii kale dib baad u soo bilaabi doontaa.*

*Haddii booska aan loo isticmaalaynin cunuga ama dhalinyaradada'yarta ah waxaad uga tagi kartaa firaaqo. Meelaha loo baahanyahay waxaa lagu xusi doonaa xidig gaduudan (*).*

| MEESHA BANAAN | FIIRO GAAR AH |
|---|---|
| Qof miyaa kaa caawiyey buuixinta foomkan? | *Ogaanshahan waxay ka caawineysa qoysaska taageerada kooxda HERO Kids Registry.* |
| Fasaxa Shaaca looga qaadayo Macluumaadka Diiwaangaliyaha | *Tani waxay siineysa HERO Kids Registry oggolaanshaha ay kula wadaageyso macluumaadka caafimaadka ee cunugaaga ama qofka dhalinyarada ah adeegyada caafimaadka ee degdega ah iyo waaxda xaaladda degdega ah.* |

| | |
|---|---|
| Magaca la doorbidayo/ma la jacelyahay in laguugu yeero | *Magaca cunuga ama dhalinyarada waa sida soo socota.* |
| Magac u yaalka la isticmaal | *Tusaalooyin: isaga/iyada, iyaga/ayaga, ze/hir* |
| Lambarka Social Security (SSN) | *Tan LOOMA baahna. Waxay aqoonsan kartaa cunuga ama dhalinyarada wadaagaysa magaca isku mid ah ee qofka kale ee ku jira diiwaanka.* |
| Jinsiga | *Jinsiga ku qoran shahaadada dhalashada ee cunuga ama qofka dhalinyarada ama mid ka mid ah dookhyada liiska hoos.* |
| Aqoonsiga Jinsiga | *Sida cunuga ama qofka dhalinyarada ah uu u arko jinsigooda, iyo sida ay u sharxaan. Tusaalooyin: rag, dumar, wiil, gabar, ama aan labadoodaba midna ahayn. Jinsiga ayaa ka duwanaan kartaa jinsiga loogu qoray dhalashada.* |
| Isirka | *Isirka ama aqoonsiga qowmiyadda cunuga ama qofka dhalinyarada ah. Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya.* |
| Luuqada la doorbidayo | *Luuqada ugu wanaagsan uu fahmi karo cunuga ama qofka dhalinyarada ah. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu aqoonsado marka turjumaan looga baahan xaladda degdega ah ee daryeelka caafimaadka.* |
| Xiriirka macluumaadka degdega ah | *Qofka la xiriirayo marka lagu jiro xaaladda degdega ah.* |
| Soo galida loogu talo galay imaylada HERO Kids | *Soo galida waxay u oggolaanaysa HERO Kids Registry inay iimayl u diraan waalidka, masuulka sharciga, ama macluumaadka qofka dhalinyarada ah, ama xusuusin ku saabsan isdiiwaangelinta HERO Kids. Ciwaanka iimaylka lalama wadaagi doono ama looma isticmaali doono ujeedo kale.* |
| Baaritaanada koowaad/xaaladaha | *Xaaladaha caafimaadka ama xaaladdaha kuwaas saameyn weyn ku leh cunuga ama qofka dhalinyarada.*<br><br>*Tusaalooyin: qalalada, naafooyinka lafaha, caafimaad ahaan nugul, dhakaakaha, Naafada Caqliga.* |
| Iyada oo lagu saleynayo waxyaabaha darruuriga ah ee dadka kala duwan ee caadiga ah | *Tusaale: Cunug qaba cudurka wadnaha kaas oo laga yaabo inuu qabo ogsajiin yar markii loo eego inta badan carruurta kale ee ku da'da ah. Macluumaadka waxay ka caawinayaan adeeg bixiyaasha inay ogaadan waxaa "caadiga ah" ama "Caadi ahaan" cunuga ama dhalinyarada.* |
| Qalabka caafimaadka ama teknoolajiyad | *Qalabka ama teknoolajiyad ee cunuga ama dhalinyarada ayaa si joogto ah u isticmaala. Tusaalooyin: xidida gororka, tuubyada, laynmanka, beerida, xubin macmal ah* |
| Aaladaha dhaqdhaqaaqa | *Aaladaha uu cunuga ama dhalinyarada ayaa si joogto ah u isticmaalaan. Tusaalooyin: Bakoorada, ulaha lagu boodo, kursiga naafada* |
| Daawada xasaasiyadaha | *Daawooyinka cunuga ama qofka dhalinyarada ay xasaasid ku yihiin, ama waxay ku qabaan xasaasiyad xun. Tusaalooyin: aspirin, latex* |
| Xasaasiyadaha deegaanka ama cuntada | *Cuntooyinka ama waxyaabaha deegaanka ee sababa xasaasiyadaha ama xasaasiyadaha xun ee cunuga ama qofka dhalinyarada ah. Tusaalooyin: qaniinyada shinida, lawska, cawska* |
| Daawoyinka | *Daawo walba oo la qoray ama dawooyinka dhakhtarka u qorin, fitinimada, daawooyinka dhireedka ee cunuga ama qofka dhalinyarada ah si joogto ah u qaato. Waxaa ku jira xashiiska daawada ah iyo CBD.* |

| | |
|---|---|
| Taarikhda istimaalka khamriga | *Garashada tani waxay ka caawineysa adeeg bixiyayaasha xaaladda degdega ah inay sameeysan go'aamada daryeelka xogoggolaaka badan. Tusaalooyin: biirta, khamriga, calaqa* |
| Taarikhda istimaalka khamriga | *Garashada tani waxay ka caawineysa adeeg bixiyayaasha xaaladda degdega ah inay sameeysan go'aamada daryeelka xogoggolaaka badan. Daawooyinka aanu qorin dhaktarka. Tusaalooyin: kookeyn, xashiish, methamphetamine* |
| Haddii la soo qaado, waa maxay isbitaalka aad doorbidayso? | *HERO Kids Registry ma damaanad qaadayaan in EMS ay awooddi doonto inay sharafto doorbidistan.* |
| Cunuga ama qofka dhalinyarada ayaa laga yabaa inuu baahdo adeegyada xaaladdaha degdega ah ee caafimaadka: | *Sababta ugu badan ee laga yaabo ee cunuga ama qofka dhalinyarada ugu baahanayo adeegyada xaaladdaha degdega ah ee caafimaadka. Tusaalooyin: qalalada, xaaladaha neefta, dhimirka ama xaaladdaha ama arrimaha caafimaadka dhimirka, xasaasiyadaha khatarta galinaya nolosha.* |
| Cunuga ama qofka dhalinyarada ah ma leedahay foomka POLST ee Oregon POLST Registry? | *POLST waxay u taagan tahay "Portable Orders for Life-Sustaining Treatment" (Amarada La qaadan Karo ee Daaweynta Nolol Badbaadinta). Haddii cunuga ama qofka dhalinyarada ah ee ka diiwaangashan Oregon POLST Registry, Sii Lambarka Aqoonsiga POLST haddii laga garanayo.* |
| EMS waxay tixgelin kartaan kuwa soo socda | *Dabeecadaha ama jawaabaha kuwaas oo caadi u ah cunuga ama qofka dhalinyarada ah. Tusaalooyin: Wuxuu ka fogaada xiriirka isha, dareenka sare ee iftiinka, dhawaaqa, taabashada, urta, garaacid, ruxid, wareejin* |
| Agabyada raaxada ah | *Agabka cunuga ama qofka dhalinyarada ah u arkaan xasiliso ama dejiso. HERO Kids Registry ma damaanad qaadayaan in EMS ay awooddi doonaan inay u daad gureeyaan agabkan isbitaalka.* |
| Erayada badqabka ah | *Erayada ama jumladaha EMS ama adeeg bixiyaasha waaxda xaaladda degdeg ah ayaa loo isticmaali karaa inay dejiso ama xasiliso cunuga ama qofka dhalinyarada.* |
| Arrimaha ama xaaladdaha saameyn karaa daryeelka | *Tusaalooyin: arrag la'aanta, arraga yar, ama aragtida adag, maqalka ama dhago la'aanta adag, laqida adag, ama aan socon karin* |
| Haddii lagu soo qaaday ambalaasta, cunuga ama qofka dhalinyarada inta badan ayaa qaabkan u noqon doona ta ugu raaxada fiican | *Xaaladaha qaar waxay ka rabaan cunuga ama qofka dhalinyarada in lagu qaado qaab gaar ah.*<br>***Kursiga Gaariga**: Kursiga badqabka ee cunuga*<br>***Jiifka dhaca-diidka (Fowler's)**: wuxuu ugu fadhiyasartiirta qeybta hore ee sariirta darajada sadax xagalka 45-60*<br>***U Jiifka Bixida**: u jiifa dhanka bidix*<br>***U jiifka dhanka Midig**: u jiifa dhanka midig*<br>***Kuwa kale***<br>***Jiifka qaabka nugul**: u jiifa wejiweji*<br>***Xooga jiifka dhaca-diidka (Semi-Fowler's)**: ugu jiifa madaxa darajada sadax xagalka 15-45*<br>***Fadhiga**: Si toosan u fadhiya*<br>***Jiifka dhabarka**: u jiifa wejiga oo cirka ku toosan*<br>***Madaxa loo rariciyo hoos (Trendelenburg)**: u jiifa wejiga oo cirka ku toosan iyo madaxa oo wax yar ka sareeya lugaha* |
| La doorbidayo qof inuu soo raaco cunuga ama qofka dhalinyarada ah | *HERO Kids Registry ma damaanad qaadayaan in EMS ay awooddi doonto inay sharafto doorbidistan.* |

| | |
|---|---|
| Warqadda Nidaamka Xaaladda Dedega ah | *Warqadda uu saxiixay adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka taas oo siineyso tilmaamaha daryeelka gaarka ah ee adeeg bixiyaasha waaxda xaaladda degdega ah. Tusaale: Emergency Protocol Letter* (tinyurl.com/4nu3pvjs) |
| Foomka Macluumaadka Xiriirka | *Emergency Information Form for Special Needs* (tinyurl.com/227ure2k) *waxaa si weyn looga aqbalaa foomka maclumaadka caafimaadka ee cunuga ama qofka dhalinyarada ah.* |

*Badhamada aad arki doonto marka aad diiwaangeliso:*

| BADHANKA | FIIRO GAAR AH |
|---|---|
| * | *Meelaha loo baahan yahay* |
| Submit | *Soo gudbinta foomka diiwaangelinta* |
| Cancel | *Tirtir dhammaan macluumaadka la galiyay oo xir foomka diiwaangelinta. Macluumaad la ma kaydinin.* |
| Back | *Ku laabo boggii hore* |
| Next | *U gudub bogga xiga* |
|  | *Wuxuu furaya hal dookh oo ah liiska hoos u furma* |
| + | *Wuxuu furaya dookhyo-badan oo ah liiska hoos u furma* |
| Select All | *Wuxuu doorayana dhammaan agabyada dookhyo-badan oo ah liiska hoos u furma* |
| Clear All | *Wuxuu tirtiraya dhammaan agabyada dookhyo-badan oo ah liiska hoos u furma* |
| Clear | *Waxay tirtiraysa shaadhaynta dookhyo-badan oo ah liiska hoos u furma* |
| Confirm | *Waxay xaqiijineysa agabyada laga doortay liiska hoos u furma* |
| Cancel | *Waxay joojineysa agabyada laga doortay liiska hoos u furma* |
| Add More | *Waxay u oggolaanaysa macluumaadka dheeriga ah meelaha gaarka ah. Tusaale: xiriirka xaaladda degdega ah, ciwaanka guriga* |
| − | *Waxay yareyneysa qeybta* |

www.herokidsregistry.org
herokids@ohsu.edu
Xafiiska ganacsiga: 833-770-4376